

Sare u qaadista caymiska iyadoo loo marayo Qorshaha Caafimaadka Oregon

Gobolka Oregon wuxuu raba:

1. Inuu hoos u dhigo heerka caymis la'aanta gobolka ee haddeer ee ah boqolkiiba lix oo lagu celiyo boqolkiiba laba ka yar, iyo
2. Inuu baabi'iyoo xaqsoor la'aanta ku salaysan jinsiyadda iyo qowmiyada ee heerarka caymis la'aanta ee hadda jira.

Si loo gaaro yoolalkan, gobolka Oregon wuxuu ka shaqayn doonaa sidii meesha looga saari lahaa caqabadaha qaabeysan ee sababay in dadka ay lumiyaan caymiskooda ama kahor istaagto inaysan helin caymis marka horeba. Istaraatiijiyadan lagu sharaxay warqadan fikradda waxay udhaweyn doonaa gobolka inuu lahaado caymis guud, iyo in sidoo kale la yareeyo xaqsoor la'aanta iyadoo dad badan oo u-qalma laga diiwaangelinayo Medicaid iyo iyadoo la sameynayo caymis muddo-dheer oo joogto ah si dadka ay caymiska ugu sii jiraan.

Maadaama boqolkiiba laba dadka aan caymiska lahayn ee Oregon ay sheegeen in aanay daneyneynin caymiska,¹ gobolka Oregon wuxuu hiigsanayaa in boqolkiiba 98 dadka gobolka uu ka diiwaangeliyo caymis la awoodi karo oo dhammaystiran, oo aan lahayn xaqsoor la'aan la taaban kara oo ku saabsan caymiska marka la isbarbardhigo kooxyada jinsiyadaha ama qowmiyadaha. Si loo gaaro yoolkan, istaraatiijiyada aan ka-tanaasulka ahayn ee lagu qeexay Lifaqa B ayaa la fulin doonaa iyadoo ay wehliyaan siyaasadaha la soojeediyay ee ka-tanaasulida tijaabada 1115(a) ee soo socda:

1. Bixi diiwaangelinta Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) oo joogta ah oo loogu talagalay carruurta illaa ay gaaraan dhalashadooda lixaad (da'da 0-5);
2. Samee isdiiwaangelinta OHP oo ah laba sano oo joogto ah oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay lix jir iyo wixii ka weyn; iyo
3. Bixi dariiqa isdiiwaangelinta OHP oo la dedejiyey oo loogu talagalay dadka dalbada macaashyada Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kabka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP).

Dhibaataada iyo Araarta

Dadku waxay u baahan yihiin caymis si ay u helaan daryeel caafimaad oo ay u xaqiijiyaan in iyaga iyo qoysaskooda ay leeyihiin caafimaad wanaagsan. Dadka aan lahayn caymisku waxa ku adag inay helaan adeegyada daryeelka caafimaadka,² waxaa laga yaabaa inay galaan dayn caafimaad oo weyn marka ay

¹ Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon (2019)


² Hailun Liang, May A. Beydoun, iyo Shaker M. Eid, Baahiyada Caafimaadka, Ka faa'iidsiga Adeegyada iyo Helitaanka Daryeel ee Bukaannada Medicaid iyo Bukaannada Aan Caymiska Lahayn ee qaba Cudurrada Raagga markay joogaan Xarumaha Caafimaadka, Joornaalka Cilmi-baarista Adeegyada Caafimaadka & Siyaasadda 24, lambarka. 3 (Luulyo 2019): 172-181.

helaan daryeel,³ waxay u badan tahay in carruurtoodu aysan heli doonin daryeelka kahortagga cudurada ee carruurta marka loo eego facooda ku caynsan Medicaid.⁴ Waxay sidoo kale aad ugu dhow yihiin inay ka daahaan daryeelka loo baahan yahay, taasoo u horseedi karta natiijooyin caafimaad oo daran isla markaana kordhin karta baahida ay u qabaan daryeel xoogan, taasoo keenayso in kharashaadka guud ee nidaamka daryeelka caafimaadka kor u kaco.^{5, 6}

In kasta si weyn loo ballaariyay caymiska stan iyo markii la hirgeliyay Sharciga Daryeelka La Awoodi Karo (ACA) iyo tijaabada 1115(a) ee Oregon ee haddeer jirta, dad aad u tiro badan oo Oregon ku nool ayaa weli haysan caymis. Heerka caymis la'aanta ee gobolka oo dhan ayaa weli ahaa ku dhowaad 6 boqolkiiba tan iyo ballaarinta ACA ee sanadii 2014. Waxaa kaloo xusid mudan in heerarka caymis la'aanta ee qaar ka mid ah bulshooyinka midabka leh iyo bulshooyinka qabaa'ilka ay laba jeer ka sareeyaan kuwa dadka kale (eeg Jantuuska 1-aad).⁷ Xaqsoor la'aanta noocan ah waxay ka tarjumaysaa in nidaamyadayagu loo qaabeeyay si ay uga faa'iideeyaan kooxaha jinsiyadaha tirada badan/awooda leh. Si aan u gaarno yoolkayaga baabi'inta xaqsoor la'aanta caafimaadka ugu dambeyn sanda 2030, gobolka Oregon waa inuu meesha ka saara caqabadaha qaab-dhismeed ee keenaya xaqsoor la'aanta caymiska.

Jaantuska 1

Bulshooyinka midabka leh ayay aad ugu badan tahay inaysan caymis lahayn



Isha xogta: Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon (2019)

³ Sherry Glied iyo Richard Kronick, Qiimaha Caymiska Caafimaadka: In yar oo ka mid ah Dadka Aan Caymiska Lahayn Ayaa Haysta Khayraadku Ku Filan oo ay ku Bixiyaan Biilasha Isbitaalka ee Suurtogalka ah (Washington, DC: Xafiiska Kaaliyaha Xoghayaha Qorshaynta iyo Qiimeynta, HHS, Maayo 2011), <http://aspe.hhs.gov/health/reports/2011/ValueofInsurance/rb.pdf>

⁴ Maya Venkataramani et al., "Spillover Effects of Adult Medicaid Expansions on Children's Use of Preventive Services," Pediatrics, Disembar 2017, <https://pediatrics.aappublications.org/content/140/6/e20170953>

⁵ Falanqaynta KFF ee Sahanka Wareysiga Caafimaadka Qarameed ee 2019. <https://www.kff.org/uninsured/issue-brief/key-facts-about-the-uninsured-population/view/footnotes/#footnote-494622-13>

⁶ Cesar I. Fernandez-Lazaro, et al., "Medication Adherence and Barriers Among Low-Income, Uninsured Patients with Multiple Chronic Conditions," Research in Social and Administrative Pharmacy 15, no. 6 (Juun 2019): 744-753.

⁷ Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon, 2019

Xaaladda socdaalku ayaa weli dadka kahor istaagayso inay helaan caymis caafimaad, taasoo sababayso qaar ka mid ah xaqsoor la'aantan. Kadib markii meel-marinta sharciga Cover All Kids (2017) iyo Cover All People (2021), Golaha Sharci-dejinta ee Oregon waxay muujiyeen go'aan adag oo ah in lacagaha gobolka la gelinayo fidinta caymis dhamaystiran oo la siinayo dadka Oregon ee xaalada socdaalka awgeed aan hadda u qalmin Medicaid.^{8,9} Si kastaba ha ahaatee, haddii aysan jirin barnaamijyo waara oo loo wada dhan yahay, dadka aan sharciyeysneyn iyo kuwa aan caymiska lahayn waxay wajahaan caqabado ku salaysan luqadda, dhaqanka, cabsi iyo caqabado kale oo ku aadan helida caymiska iyo daryeelka.¹⁰ Gobolka Oregon wuxuu doonayaa inuu wax ka qabto caqabadahan isagoo ballaarinayo wacyigelinta iyo dadaallada waxbarasho ee dhaqan habboon ee haddeer jira si dadka loogu xiro caymiska gobolka ku salaysan ama Medicaid taasoo ah mid ku xiran xaaladahooda, iyo in la xaqiijiyo in ay heli karaan adeegyada daryeelka caafimaadka markii loo baahdo.

Dadka aan caymiska lahayn ee Oregon intooda badan waxay uqalmaan caymiska Medicaid ama Marketplace. Falanqaynta Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon (OHIS) ayaa muujinaya waxyaabaha soo socda:

In ka badan saddex-meelood hal meel dadka aan caymiska lahayn ee Oregon ayaa sheegay in “luminta caymiska OHP” ay sabab u tahay caymis la'aatooda.¹¹ Xogta Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon waxa ay soo jeedinaysaa in dad badan oo aan caymis lahayn oo ku nool Oregon laga yaabo in ay wali uqalmaan OHP xitaa marka lumiyaan/waayaan caymiska OHP, sidaa darteedna ay dib isaga diiwaangelin karaan sannad ama laba sano gudahood.

Luminta shaqada (23%), caymiska ku salaysan loo-shaqeeyaha oo aan la awoodi karin (20%), saacadaha shaqada oo yaraaday taasoo keenayso in aanan loo qalmin caymiska shaqada ku salaysan (12%), iyo in loo-shaqeeyuhu uu joojiyay bixinta caymiska (7%) ayaa ah sababaha kale ee keena caymis la'aanta.

Ku dhowaad 78% dadka aan caymiska lahayn ee Oregon ayay u badan tahay inay uqalmaan OHP ama caymiska la kabo ee Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace. Ku dhowaad 26% dadka aan caymiska lahayn ee Oregon ayay u badan tahay inay uqalmaan OHP. Saamiga carruurta aan caymiska lahayn ee u-qalma Medicaid ayaa xitaa ka sii badan: ku dhowaad 60% carruurta aan caymiska lahayn ee Oregon ayaa u-qalma CHIP. Ku dhowaad 52% dadka aan caymiska lahayn ee ku nool Oregon ayay u badan tahay inay u qalmaan caymiska la kabo iyadoo loo marayo Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace

Dadka midabka leh ayaa aad ugu badan dadka aan caymiska lahayn ee ay u badan tahay inay u qalmaan OHP. Tani waxay ka dhigan tahay in dadaalo diiradda saarayo sidii si fiican caymis loo siin lahaa dadka u-qalma OHP ay yihiin istaraatiijiyad muhiim ah oo lagu yareyn kara xaqsoor la'aanta caymiska. Marka la eego bulshooyinka ah Isbaanishka ama Latiinka ah, 1 ka mid ah 3 qofba ayaa dhici karta inuu u-qalmo OHP balse uusan diiwaangashaneyn; sidoo kale

⁸ <https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2021R1/Measures/Overview/HB3352>

⁹ <https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2017R1/Downloads/MeasureDocument/SB558/Enrolled>

¹⁰ <https://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC4634824/>

¹¹ Sahanka Caymiska Caafimaadka Oregon, 2019

marka la eego dadka aan Isbaanishka ahayn ee isku aqoonsan inay leeyihiin jinsiyad aan ahayn Caddaan, qiyaastii 42% waxay helaan dakhli ay ugu qalmaan OHP.

Carqaladeynta caymiska ee ay muujisay xogta OHIS waxay noqon kartaa mid nolosha wax ka beddesha maxaa yeelay carqaladayntu waxay sababtaa in dadku heli waayaan daryeelka ama lumiyaan xiriirada xidhiidh ay la yeesheen bixiyeyaasha ay ku kalsoon yihiin. Daraasad la sameeyay 2015 ayaa baartay saamaynta dallacaad raadsiga caymis (beddelida noocyada caymiska ama luminta kadibna dib iskugu diiwaangelinta caymiska) waxayna muujisay in dadka la kulmay nusqaan caymis iyadoo qayb ka tahay “dallacaad raadsigooda caymis” ay u badan tahay inay beddelaan dhakhaatiirtooda ayna u badan tahay inay ka boodaan garoojooyin daawo ama joojiyaan qaadashada daawada, marka la barbardhigo dadka aan la kulmin nusqaan caymis. Dadka la kulmay nusqaan caymis ayaa sidoo kale ay aad ugu badnaa inay soo sheegaan daahitaan daryeel oo la xiriira kharashka, bixinta biilasha oo dhib ah, ama helaya kaliya daryeel heer dhexdhexaad ah ama liita. Dhammaadkii, kala bar dadka la kulmay nusqaanka caymis ayaa waxay sheegeen inay saamayn xun ku yeelatay guud ahaan caafimaadkooda iyo tayada daryeelkooda (marka la barbardhigo boqolkiiba 20 dadka aan la kulmin nusqaanka caymis).¹² Intaas waxaa dheer, falanqaynta 2015 ee xogta qaran ee 2005-2010 ayaa waxay qiyaastay in kharashka maamul ee qofka ka baxaya/dib-u-helayo caymiska hal mar, oo ay ku jiraan ka bixida iyo dib isku diiwaangelinta, uu noqon karay in udhexeeya \$400 iyo \$600 sanadkii 2015, qadar laga yaabo inuu intaas ka sareeyo hadda.¹³

Gobolka Oregon wuxuu doonayaa inuu kordhiyo u-qalmida joogtada ah ee carruurta oo laga dhigo dhalashada ilaa taariikhdooda dhalasho ee lixaad iyadoo la raacayo himilada lagu xaqiijinayo in dhammaan carruurta ay galaan dugsiga iyadoo diyaar u ah inay wax bartaan. Sida lagu cadeeyay hagida Oregon ee barnaamijka Raise Up Oregon,¹⁴ kordhinta hormarinta caafimaadka jireed iyo midka shucuureed-bulsheed ee caruurta iyo kahortagga cudurada, iyo in goor hore la aqoonsado carruurta yaryar ee qaba baahiyo shucuureed-bulsheed, kuwa korriin iyo kuwa quseeya daryeelka caafimaadka ayaa muhiim u ah himiladan/yoolkan. Caymiska joogtada ah ee carruurta yaryar waa qalab muhiim ah oo kor loogu qaadi kara helitaanka joogtada ah ee daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kahortagga cudurada ee loo baahan yahay si loo aqoonsado waxna looga qabto walaacyada jireed, kuwa habdhaqameed, iyo kuwa korriinka kahor inta aysan carqaladayn waxqabadka/waxbarashada cunuga ee dugsiga.¹⁵ Daraasado ayaa muujinaya in caymiska aan joogtada ahayn uu keenaya suurtoogalnimo sare oo ah in aan la daboolin baahiyada caafimaadka, daawooyinka uu dhakhtarka qoro iyo baahiyada daryeelka ilkaha, daahitaanka helida daryeelka degdegga ah (14) iyo suurtoogalnimo ah inay hooseyso in daryeelka iyo daryeelka faydaqabka ilmaha laga helo il joogta ah^{16,17}. Nusqaamahan ku saabsan helitaanka daryeelka ayaa waxay si gaar ah u saameynayaan carruurta aan gaarin da'da dugsiga ee Oregon ay mudnaanta siisay, waxayna

¹² <https://www.healthaffairs.org/doi/10.1377/hlthaff.2016.0455>

¹³ <https://www.healthaffairs.org/doi/10.1377/hlthaff.2014.1204>

¹⁴ <https://oregonearlylearning.com/wp-content/uploads/2019/01/Raise-Up-Oregon-Web-corrected.pdf>

¹⁵ <https://ccf.georgetown.edu/wp-content/uploads/2021/07/Continuous-Coverage-Medicaid-CHIP-final.pdf>

¹⁶ Jennifer E. DeVoe, Alan Graham, Lisa Krois, Jeanene Smith, Gerry L. Fairbrother, “Mind the Gap” in Children’s Health Insurance Coverage: Miyuu Dhererka Nusqaanka Caymiska Ilmaha Muhiim Yahay?, Carruurta Bukaank-socodka ah, Werinta 8-aad, Soo-saarista 2-aad, 2008.

¹⁷ Cassidy A, Fairbrother G, Newacheck PW. Saamaynta xasillooni darida caymisku au ku leedahay in carruurta helaan, ka faa’iidaystaan, oo ku qancaan daryeelka caafimaadka. Caruurta Bukaank-socodka ah. 2008 Sep-Oct;8(5):321-8. doi: 10.1016/j.ambp.2008.04.007. Epub 2008 Juun 16. PMID: 18922506.

khubaradu ku talinayaan 16 baaritaan oo loogu talagalay faydaqabka ilmaha oo la sameynayo kahor da'da 6 jir.¹⁸

Gobolka Oregon wuxuu sidoo kale hirgelinayaa xalal siyaasadeed oo kala duwan si dadka aan caymiska lahayn looga diwaangeliyo OHP ama caymiska la kabo iyadoo loo marayo Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace. Si dadaal loogu bixiyo toosinta/hagida iyo fududeynta iska diiwaangelinta barnaamijyada kaalmada iyo horumarinta mahadhada isticmaalaha, Oregon waxay sanadkii 2015 hirgelisay nidaamka U-qalmitaanka Oregon (ONE) ee loogu talagalay barnaamijyada MAGI Medicaid/CHIP, waxayna cusboonaysiisay nidaamka 2020 si loogu daro SNAP, TANF, iyo barnaamijyada Xannaanada Maalinta ee la Xiriirta Shaqada (ERDC).¹⁹

Sanadkii 2013, Oregon waxay hirgelisay nidaam isdiwaangelin oo la dedejiyay iyadoo la raacayo hagidda CMS ee la helay, taasoo gobolku u sameeyay wacyigelin lala beegsaday qaatayaasha SNAP kuwaasoo ay u badneyd in ay u-qalmaan balse aysan ka diiwaangashanayn OHP.²⁰ Falanqaynta xubinnimada SNAP ee 2021 waxay muujinaysaa in qiyaastii 17% dadka qaangaarka ah (da'da 19 iyo ka kore) ee xubnaha SNAP ee dakhligoodu ka hooseeya 138% FPL (sida ku cad xisaabinta qoyska iyo dakhliga ee SNAP) aysan ka diiwaangashanayn OHP, iyo in 7% ilmaha (da'da 18 ama ka yar) ah xubnaha SNAP ee dakhligoodu ka hooseeyo 305% FPL aysan ku jirin OHP. Tani waxay soojeedinaysaa fursad lagu isticmaali kara ilaha xogta ee barnaamijyada kala duwan si loo kordhiyo caymiska OHP.

Istaraatiijiyadaha la soojeediyay

Marka la eego arrimaha kor lagu soo sheegay, way caddahay in ay jiraan caqabado laga ahaan karo oo qusseyo caymiska iyo sii wadida caymiska; iyo in caqabadahani ay si weyn u waxyeeleeyaan dadka ka tirsan bulshooyinka midabka leh ayna keenaan xaqsoor la'aan caafimaad. Dadka midabka leh ayay u badan tahay inaysan lahayn caymis, sidaas darteed Oregon waxay mudnaan siinaysaa buuxinta nusqaamaha nidaamka ee sababay in dadka ay lumiyaan caymiska ama ka horistaagayo inay is-diiwaangeliyaan marka hore. Inkastoo Golaha Sharci-dejinta ee Oregon uu qaaday tillaabooyin lagu ballaarinayo helitaanka caymiska ee xaqsoorka leh, istaraatiijiyada hoos lagu sharraxay ayaa loogu talagalay in wax looga qabto caqabadaha qaab-dhismeed ee haray ee ku aadan caymiska ee keena xaqsoor la'aanta caafimaadka.

Samee diiwaangelin joogta ah oo loogu talagalay carruurta inta lagu gudajiro sanadaha hore ee cimrigooda

1. Sii diiwaangelin joogta ah oo loogu talagalay carruurta ilaa ay gaaraan taariikhdooda dhalasho ee 6-aad

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa inuu sii joogto ah u diwaangeliya carruurta illaa dhammaadka bisha ay ku beegan tahay taariikhdooda dhalasho ee 6-aad, iyadoo aan la eegayn marka ugu hore ee ay iska diiwaangeliyeen Qorshaha Caafimaadka Oregon, iyo iyadoo aan la eegayn isbeddellada xaaladaha ee

¹⁸ <https://ccf.georgetown.edu/wp-content/uploads/2018/10/Promoting-Healthy-Development-v5-1.pdf>

¹⁹ ONE.oregon.gov waa nidaamka kaliya ee Oregon ee laga codsado macaashyada caafimaadka iyo adeegyada aadanaha

²⁰ Warqadda SHO ee ku taariikhaysan Maayo 17, 2013, cinwaankeeduna yahay "TiXRAACA: Fududeynta Iska Diiwaangelinta Medicaid iyo CHIP iyo Cusbooneysiinta 2014"

sababi kara lumida u-qalmitaanka. Gobolka Oregon wuxuu hadda fuliyaa xulashada federaalka ee 12-ka bilood ah ee diiwaangelinta dhammaan carruurta da'doodu tahay 0-18 jir, iyadoo ay jiraan qawaaniin caymiska looga saarayo carruurta da'doodu tahay 19 jir ama ka tagaya gobolka, sida ay dhigayaan shuruudaha federaalka. In wakhtigan loo kordhiyo carruurta yaryar waxay xasilin doontaa caymiskooda sidaas awgeedna waxay kordhin doontaa helitaanka baaritaanada iyo daaweynta lagama maarmaanka ah ee carruurta yaryar.

Caymiska OHP oo joogto ah wuxuu yaraynayaa dallacaad raadsiga caymis ee dadkan nugul wuxuuna oggolaanayaa helitaan daryeel oo badan oo la saadaalin karo, taasoo ah arrin muhiim u ah hormarinta caafimaadka. Maadaama in badan oo ka mid ah carruurta ay weli u-qalmaan caymiska, ciribtirida dallacaad raadsiga caymis ayaa sidoo kale baabi'ineyso kharaadka maamuleed ee gobolka iyo culeyska saaran qoysaska ee dib-u-fulinta codsiyada. Intaas waxaa dheer, kordhinta tirada carruurta ee sida joogtada ah ugu jira caymiska ayaa waxay ugu dambeyntii hoos u dhigi kartaa kharashyada caymiska ee xubinkiiba, maadaama carruurta ku jiray OHP muddo dheer ay si fiican u heli doonaan adeegyada kahortagga cudurada iyo adeegyada daryeelka aasaasiga ah ee yareyn kara baahida loo qaba daaweynta qaaliga ah ee ka dhalato daahinta daryeelka. Kordhinta wakhtiga u dhexeeya dib-u-eegisyada u-qalmitaanka xubnaha kale ee qoyska waxay sii yarayn doonta culayska maamuleed ee saaran qoysaska waxayna kordhin doontaa xasiloonaada caymiska shakhsiyaadka iyo qoysaska OHP.

Dhowr siyaasadaha yareeya dallacaad raadsiga caymis ee xubnaha Medicaid

2. Samee isdiiwaangelinta OHP oo ah laba sano oo joogto ah oo loogu talagalay dadka da'doodu tahay 6 jir iyo wixii ka weyn

Oregon waxay sidoo kale doonaysaa in ay bixiso isdiiwaangelin joogto ah oo soconaysa laba sano oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee da'doodu tahay 6 jir iyo wixii ka weyn, iyadoo aan la eegayn isbeddellada xaaladaha sababi kara luminta u-qalmitaanka caymiska. Isbeddelkan wuxuu:

- xasilin doonaa caymiska carruurta iyo dadka waaweyn,
- kordhin doonaa helitaanka adeegyada aasaasiga ah iyo kuwa kahortagga cudurada, iyo
- ilaalin doonaa in bukaanka sii wado helitaanka daryeelka joogtada ah.

Sameynta isdiiwaangelin joogto ah iyo kordhinta waqtiga udhexeeya dib-u-cusboonaysiisyada u-qalmitaanka waxay ilaalin doonaan guulaha la gaaray ee sii wadida caymiska gaar ahaan marka la eego xeerarka kaalmada COVID ee dowlada federaalku ansixisay 2020. 2018 iyo 2019, ku dhawaad 25% isdiiwaangeliyeyaasha cusub ee OHP ayaa waxaa OHP laga diiwaangaliyay 6 bilood ee la soo dhaafay. 6-da bilood ee ugu dambaysay 2020, heerkani wuxuu hoos ugu dhacay keliya 5% isdiiwaangeliyeyaasha cusub. Xawaaraha ay dadku dib iskaga diiwaangeliyeen OHP ayaa waxay soojeedinaysaa in laga yaabo inay luminayeen caymiska OHP in kasta oo ay u-qalmeen. Hoos u dhaca ku yimid heerkani isdiiwaangeliyeyaasha cusub ayaa soojeedinaysa in siyaasadaha federaaliga ah ee la meel-mariyay xilliga safmareenka si loo ilaaliyo hoos u dhac ku yimaada dadka caymiska ku jira inay si guul leh u yareeyeen dallacaad raadsiga caymis ee Medicaid.

Hag/fududee isdiwaangelinta iyo hab-raacyada u-qalmitaanka ee loogu talagalay dadka doonaya macaashyo kale

3. Bixi dariiqa isdiwaangelinta OHP oo la dedejiyey oo loogu talagalay dadka codsado macaashyada SNAP

Gobolka Oregon wuxuu codsanayaa xulashada isdiwaangelinta OHP oo la dedejiyey oo loogu talagalay dadka dalbada macaashyada Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Kabka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP). Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu aqoonsan doonaa dadka: 1) qayb ka ah kiiska SNAP 2) leh dakhli gaarayo miqyaasyada lagu dabaqi karo OHP iyo 3) aan codsaneynin ama aan iska diiwaangelin OHP. Dadka ayaa la soo ogeysiin doonaa inay u-qalmaan inay iska diiwaangeliyaan OHP iyo in kale iyadoo lagu salaynayo macluumaadkooda SNAP. Kuwa si togan uga jawaaba oo ka jawaaba su'aalaha ugu yar (si loo xaqiijiyo in diiwaangelinta OHP aysan carqaladeyneynin Medicare, caymiska Marketplace, ama adeegyada la xidhiidha da'da iyo naafanimada) ayaa laga diiwaangelin doonaa OHP iyadoo la adeegsanayo xissabinta qoyska iyo dakhliga ee ay dejisay siyaasadda barnaamijka SNAP.

In macluumaadka kiiska SNAP loo isticmaalo diiwaangelinta Medicaid/CHIP waxaa taageero CMS marka la eego warqadda SHO # 15-001 ee 2015 ee cinwaankeedu yahay, "TIXRAACA: Xulashooyinka Siyaasadda ee Isticmaalka SNAP si loo Go'aamiyo U-qalmitaanka Medicaid iyo Cusboonaysiinta ku Aadan Istaraatiijiyadaha Diiwaangelinta Beegsiga ah." Oggolaanshahan lagu bixiyay warqadan SHO wuxuu ku kooban yahay xaaladaha ay shuruudaha u-qalmitaanka ee udhexeeya SNAP iyo Medicaid/CHIP ay is waafaqsan yihiin waxayna meesha ka saaraysaa qoysaska SNAP halka ay ku kala duwan yihiin. Gaar ahaan, qoysaska SNAP ee ay ku jiraan "dad aan muwaaddiniin ahayn ee aan u-qalmin caymiska" ayaan loo tixgelin doonin diiwaangelinta Medicaid/CHIP ee la dedejiyay; dad badan oo sharcigooda socdaalka uu buuxinayo shuruudaha Medicaid/CHIP ee loogu talagalay caymiska dhammaystiran; iyo dhammaan dadka u-qalma CAWEM, Cover All Kids, ama dadka u-qalma Cover All People ayaa laga saarayaa meesha marka la raaco oggolaanshahaa. Sababtan awgeed, Oregon waxay codsanaysaa qoddobo tanaasulaad si ay awood ugu siiso OHA inay u-qalmitaanka OHP ee codsadayaasha ay ku salayso macluumaadka kiiskooda SNAP xitaa marka xogta qaar ee caadiyan loo isticmaalo go'aaminta u-qalmitaanka Medicaid aanan la heli karin. Dadka hela caymiska OHP iyagoo u marayo tubta la dedejiyay ee SNAP waxay noqon doonaan kuwa si joogto ah ugu qalmo muddo laba sano ah laga bilaabo diiwaangelintooda ugu horeeysa ee OHP. Laba sano kadib, waxay mari doonaan nidaamkadib u go'aaminta OHP ee caadiga ah.

Diiwaangelinta codsadayaasha SNAP waxay sii fududayn doontaa culayska saaran qoysaska adeegyo ka codsanayo barnaamijyo badan. Isbeddelkan waa inuu kordhiyaa diiwaangelinta Qorshaha Caafimaadka Oregon oo uu kordhiyaa waxtarka labada barnaamij maaddaama ay si wadajir ah u daboolaan baahiyada shakhsiyeed iyo kuwa qoysaska.

Waxa siyaasadahani uga dhigan yihiin xubnaha OHP

Dadka u-qalma balse aan ka diiwaangashaneyn OHP, waxaa jiri doonta wacyigelin iyo ku lug lahaansho dheeraad ah oo lagu taagerayo diiwaangelinta OHP, oo caadiyan lagu bixin doona luuqada uu xubinka ku hadla ama waxaa bixin doona iskaashato lagu kalsoon yahay iyo ururada bulsheed kuwaasoo caawin kara xubinka. Haddii qofka ama qoyska ay helaan macaashyo kale, sida kaalmada cuntada ee uu bixiyo Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeriga ah, oo mararka qaarkood loo yaqaan Oregon Trail Card ama EBT, laakiin aysan lahayn caymis caafimaad, waxaa laga yaabaa inay helaan macluumaad ku saabsan isdiwaangelinta OHP oo ay shuruudaheeda macluumaadka cusub yar yihiin.

Carruurta ku jirta OHP, diiwaangelinta joogtada ah laga bilaabo dhalashada ilaa taariikhdooda dhalasho ee lixaad waxay ka dhigan tahay in caymiska caafimaadka iyo helitaanka adeeg bixiyayaasha la yaqaan ay joogto ahaan doonaan taasoo yareeyneyso carqaladaynta caymiska inta cunuga uu ku jira sannadaha dugsiga kahor ah marka baaritaanada joogtada ah ay yihiin kuwa aad muhiim u ah.

Waalidiinta iyo daryeelayaasha carruurta kujirta OHP ee da'doodu tahay lix iyo wixii ka kore, siyaasadda isdiiwaangelinta joogtada ah ee laba sano soconayso waxay ka dhigan tahay in aysan welweli doonin haddii uu jira isbeddel yar oo ku yimaada shaqada ama dakhliga kaasoo carqaladayn kara daryeelka carruurta iyo dadka waaweyn. Waalidiinta iyo dadka kale ee qaangaarka ah ee ku jira OHP ayaa sidoo kale ka faa'iideysan doona waqtiyada dheer ee udhaxeeya dib-u-cusbooneysiisyada, yaraynta diiqada/istireeska, yaraynta istireeska bixinta lacagta daryeelka caafimaadka waxaana joogto u ahaan doonta helitaanka bixiyayaasha ay yaqaanaan.

Lifaaqa A

Istaraatiijiyadaha (aan ahayn ka-tanaasulka-1115(a)) dheeraadka ah

Hoos waxaa ah istaraatiijiyado dheeraad ah oo Oregon ay raacayso si ay u taageerto shaqadan. Haddii loo baahdo, Oregon waxa laga yaabaa inay raacdo ka-tanaasulaadyada 1332 iyo habab kale si loo hirgeliyo istaraatiijiyadan.

1. Samee dib-u-habayn ku aadan suuqa caymiska ganacsi taasoo loogu talagalay in lagu wanaajiyo joogteynta caymiska iyo helitaanka daryeelka ee dadka hela caymis caafimaad iyadoo adeegsanayo Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace, iyadoo xoogga la saarayo siyaasadaha iyo istaraatiijiyada caawiya dadka iyo qoysaska marka ay ka guuraan Medicaid una guuraan caymis ganacsi, gaar ahaan iyadoo loo marayo codsiga ka-tanaasulida 1332.
2. Caymiska Medicaid ee dhalimada kadib u kordhi dadka dhala oo uga dhig 12 bilood bisha Abriil 2022 iyadoo loo marayo wax-ka-beddelka qorshaha gobolka (SPA) sida ku cad qodobbada Sharciga Qorshaha Samatabbixinta ee Mareykanka ee 2021.
3. Xaqiiji in CCO-yada ay sii wadaan bixinta adeegyada wacyigalinta iyo hagida ee socda kuwaasoo taageera oona joogteeya xubnaha jira ee weli u-qalma kahor taariikhaha dib u go'aaminta oo xaqiiji in la isku-duwa dadaalada wacyigalinta iyo ku lug lahaanshaha ee dhammaan barnaamijyada.
4. Maadaama la meel-mariyay sharciga Senate Bill 65²¹ inta lagu gudajiray kalfadhiga Golaha Sharci-dejinta ee Oregon ee 2021, mas'uuliyadda hawlgalka / maamulka Caymiska Caafimaadka Oregon ee Marketplace waxaa la wareegi doona OHA. La wareegani/isbeddelkani wuxuu OHA u oggolaan doonaa inay si fudud u aqoonsato fursadaha lagu xasiliinayo caymiska dadka udhexeeya caymiska OHP iyo caymiska Marketplace.
5. La jaanqaad dadaallada kale ee jira ee gobolka iyo dawladda dhexe ee lagu doonayo in lagu ballaariyo ama lagu xasiliyo caymiska daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan Koox-hawleedka Helitaanka Guud ee Daryeelka Caafimaad ee Oregon iyo dadaallada sharci-dejinta ee lagu raadinayo ikhtiyaar dawladeed oo ku saleysan gobolka.²²
6. Sii wad hirgelinta Cover All Kids (2017) iyo Cover All People (2021), oo ah dadaallo kaaba/dheeraad ah oo ku salaysan ballan-qaadka golaha sharci-dejinta ee Oregon ee ah in caymis la siiyo dadka Oregon ee aan hadda u-qalmin Medicaid sharciga socdaal awgii.
7. Sii wad hirgelinta dheefaha barnaamijka Citizen Alien Waived Emergent Medical (CAWEM) si loogu daro adeegyo badan oo lagu daray qeexitaanka dheefaha degdega ah iyo caymis kab oo loogu talagalay Cover All people, in lacagaha CAWEM la geliyo adeegyada degdega ah ee ay helaan dadka ka diiwaangashan Cover All People.
8. U oggolow codsadyaasha inay iyaga xaqiijiyaan dakhligooda, maadaama tani tahay siyaasad ku guulaysatay inay baabi'iso dallacaad raadsiga caymis intii lagu jiray safmareenka COVID-19.²³

²¹ <https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2021R1/Measures/Overview/SB65>

²² <https://www.oregon.gov/oha/HPA/HP/Pages/Task-Force-Universal-Health-Care.aspx>

²³ Falanqaynta OHA ee xogta diiwaangelinta Medicaid

Gobolka Oregon wuxuu jeclaan lahaa inuu sii haysato siyaasadda qayb ka ahayd Gurmada Caafimaadka Dadweynaha si loo hago habka codsiga iyo dib-u-go'aaminta. Isbeddelkani wuxuu kordhiyay xawaaraha ay codsadaayaashu caddayn muujineyso caymiska waxayna awoodaan inay helitaan daryeelka iyadoo loo oggolaanayo caymiska kahor intaan la xaqiijin dakhliga.

9. Iswaafaji waqtiga dib-u-cusboonaysiinta u-qalmitaanka xubnaha si markaa dib-u-go'aaminta u-qalmitaanka xubnaha ee SNAP, TANF iyo OHP ay isku mar u dhacaan. Isbeddelkan ayaa fududayn doona nidaamka ay qoysasku ku sii haysan karaan adeegyada wuxuuna hoos u dhigi doonaa kharashaadka maamuleed ee gobolka.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) community.outreach@dhs.ohio.gov ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.